

Waqtigii loo baahnaa: Isbahaysiga gobolka Washington ayaa soosaarey Qorshe 10-Sano soconaya oo Lagu Furfurayo Saboolnimada oo ah qorshe tafatiran oo qeexan oo loogu talagalay mustaqbal loo siman yahay, oo cadaalad ku dhisan

Xiriirrada:

[Lindy Henry](#), Kala-furfur Saboolnimada (Dismantle Poverty) ee ka jira Washington iyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada' Maamulka Adeegyada Dhaqaalaha

[Penny Thomas](#), Waaxda Ganacsiga

[Norah West](#), Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada

[Clare DeLong](#), Waaxda Damaannada Shaqada

14-ka Jan., 2021

OLYMPIA – Washington ayaa muddo dheer ka mid ahayd gobollada dalka ee kaalinta sare kaga jira in lagu noolaado, gobolkanna waxaa uu dhaqan geliyay dhowr siyaasadood oo horseed u ah in la taageero qoysaska dakhligoodu hooseeyo sida mushaarka ugu yar oo xoogan, Deeqda Kuleejka Washington, fasaxa qoyska iyo caafimaadka oo mushaar lagu qaato, fasaxa bukaanka oo mushaar lagu qaato iyo dheefta daryeelka muddada dheer ee dadweynaha ee ah tii ugu horreysay qaranka.

Haseyeeshee, saboolnimada, ayaa ahayd caqabad joogto ah, inkasta oo dhaqaalaha Washington uu si joogto ah uga mid ahaa kaalimaha ugu wanaagsan. In kasta oo uu dhaqaale xoog leh uu jiray ka hor cudurka safmarka ah ee COVID-19, ku dhowaad mid ka mid ah afartii qof oo reer Washington – 1.75 milyan oo qof, oo ay ka mid yihiin 500,000 oo carruur ah – ayaa ku dhibtoonayay in nolol maalmeedkooda ay helaan. Cudurka safmarka ah ayaa horseeday dhibaato dhaqaale iyo mid caafimaadka guud ah oo soo bandhigtay kala duwanaansho badan oo ka dhex jira bulshooyinkeenna.

[Koox Halweedda Yareynta Saboolnimada](#) ee Guddoomiye Jay Inslee waxay leedahay qorshe waqtiga ku kulmayaan iyada oo loo marayo Qorshaheeda tafatiran ee qeexan ee loogu talagalay Mustaqbal Loo Siman Yahay, oo Cadaalad ku dhisan: Qorshaha [10-Sano Soconaya ee Lagu Furfurayo Saboolnimada](#) ee loogu talagalay dhammaan dadka Reer Washington. Inslee ayaa daahfuray koox-hawleeddan 2017 si ay u diyaariso qorshe istiraatiijik ah oo lagu yareynayo saboolnimada iyo sinnaan la'aanta. Iyaga oo wehliya hoggaanka hay'adeed ee ka socda Waaxda Ganacsiga, Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada iyo Waaxda Damaannada Shaqada, [koox-hawleedda](#) waa koox ka kooban 45 daneeyayaal kala duwan, hawshan ay ka go'an tahay, oo ayna awood siiyaan ama taageeraan guddi joogto ah oo ka kooban 22-xubnood oo ah dad sabool ah. Qorshaha waxaa uu leeyahay [sideed istiraatiijiyadood iyo 60 talo oo la soo-jeediyay](#) si ay gacan uga geystaan ciribtirka saboolnimada.

“Isbeddelka nidaamiga ah ayaa suuragal noqda marka aynu aqoonsano in 'nidaamku' aynu anagga nahay,” ayuu yiri Inslee. “Dadka u shaqeynaya dowladda gobolka iyo dowladda hoose, hay'adaha aan faa'iidada u shaqeyn, ganacsiyada iyo kuwo samafalka ee guud ahaan gobolka ayaa dhammaan leh door ay ka qaataan. Waxaa ay keliya ku xiran tahay rabitaankeenna in aynu tallaabo qaado ... sidaa daraadeed aynu shaqeyno.”

“Kuwiinna hadda leh awoodda ay ku go'aamiyaan haddii iyo sida loo dhaqmo, fadlan xusuusnow in malaayiin reer Washington, oo innaga oo kale ah, in ay ku sii dhibtoon doonaan in ay hoy helaan, ku dhibtoon doonnaan in ay carruurtooda quudiyaan iyo in ay ku noolaadaan degganaansho la'aanta in ay xaaladdu HAGAAGI dooonto,” ayaa waxaa yiri Drayton Jackson iyo Juanita Maestas, oo wada-guddoominaya guddiga joogtada ah ee Koox-Hawleedda Yareynta Saboolnimada. “Fadlan ha iloobin in aynu nahay dad tiro badan, nolosha ayaad ku faa'iidi doontaa haddii aad doorato in aad wax ka qabato.”

Gobolka iyo guud ahaan dalka oo dhan, culeyska [saboolnimada ma ahan mid loo siman yahay](#), iyada oo si aan isku dheellitirnayn u saameysay dadka madowga ah, haweenka (gaar ahaan kuwa carruurta yaryar haysta), dadka naafada ah, bulshada khaniisiinta ah (LGBTQ), qaxootiga iyo dadka soogalootiga ah.

“Taariikhda ayaa muujinaysa in xilliyada uu dhaco khalkhal baaxad leh in uu la socdo isbeddel dhaqaale, dhaqan iyo mid bulsho oo weyn,” ayuu yiri Tim Probst, oo ah Agaasimaha Deeqaha ee ESD ahna la-guddoomiyaha koox hawleedda. “Xilliganna waxba kama duwana, soosaaridda Qorshaha 10-Sano ee waqtigii loo baahnaa la soosaarey ayaa muujinaysa istiraatiijiyadaha iyo talooyinka aynu bilaabi karno hirgelintooda maanta si aynu u dhiso mustaqbal loo siman yahay oo cadaalad ku dhisan.”

-- in kale --

“Waxaannu ku faraxsanahay in aynu wada-hoggaamino oo aan soosaarno Qorshaha 10-Sano,” ayuu tiri David Stillman, Kaaliyaha Xoghayaha Maamulka Adeegyada Dhaqaalaha ee DSHS iyo la-guddoomiyaha koox hawleedda. “Istiraatiijiyadaha iyo talooyinka ku xusan qorshahan waa kuwo xog iyo caddeyn ku saleysan, waxaanna ku soo waramay guddi joogto ah oo ka kooban dad saboolnimo la dhibaataysan, kuwaas oo gacan naga siiya hagidda mudnaaneheenna.”

Saboolnimada keliya uma keento natiijooyin aan fiicnayn dhammaan dadka ay taabatey, gobolka Washington, dhaqaalaha ayaa ku dhowaad \$40 bilyan sii xoogaysanaya haddii saboolnimada la yareeyo oo la baabbi'iyu farqiyada isirrada ee dakhliga.

“Yareynta saboolnimada iyo sinnaan la'aanta kuma koobna oo keliyo faa'iidooyin dhaqaale,” ayuu yiri Diane Klontz, Kaaliyaha Agaasimaha Waaxda Ganacsiga iyo la-guddoomiyaha koox hawleedda. “Sidoo kale waxay ku saabsan tahay sharaf, dadnimo iyo lahaansho. Marka dadka reer Washington la daboolo baahiyadooda aasaasiga ah oo ay dareemaan in noloshooda la qiimeeyo, waxay u badan tahay in ay bararaan oo si buuxda wax ugu soo biirriyaan qoysaskooda, iskuullada, bulshooyinka iyo shaqooyinka.”

Booqo www.dismantlepovertyinwa.com si aad u akhriso qorshaha oo dhan, oo aad wax uga barato Koox Hawleedda Yareynta Saboolnimada iyo Guddiga Joogtada ah, oo aadna isu-diiwaangeliso si aad hawsha ugu xirnaato. Kala-soco baraha bulshada [@DismantlePovWA](https://twitter.com/DismantlePovWA) barta Twitter iyo [@DismantlePovertyinWA](https://www.facebook.com/DismantlePovertyinWA) barta Facebook. Haddii aad qabto su'aalo kale, ku soo dir email-kan PRWG@dshs.wa.gov.

###



Washington State
Department of
Commerce



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives



Employment
Security
Department
WASHINGTON STATE